



## Isticmaalka kaarka TAP ka

Kaararka (Go-To Cards) ee leh TAP ku waxaa ay leeyihiin dhamaan manfacyo la mid ah kuwa Kaarka Go-To Card – sida ku kaydsiga wareejinta iyo ilaalinta baaqiyada. Raacayaasha waxaa la siin doonaa kiro \$1 ah muddo sannad dhan ah ka dib marka ugu horeeysa ee ay isticmaalaan. Qiimahaan jabani kama shaqeynayo baasaska Metro Mobility ama kuwaTransit Link kaliyana qayb uun baa jaban kirooyinka laga bixinayo Northstar. Macaamiishu waxaa ay cosboonaysiisan karaan TAP kooda hal sanno ka dib hadii ay wali xaq u leeyihiin.

### Quick Tips

Hadii kaarkaaga baas raaca uu dhumo ama lagaa xado: La xiriir Xafiiska Xiriirkha Macaamiisha ee at 612-373-3333.

Hadii kaarkaaga bas raacu shaqeyn waayo: Kirada ku bixi lacag cadaan ah ka dibna la xiriir maamulaha barnaamijkaaga si aad u codsato in kaar kale laguu soo diro. Hubi waqtiga uu dhacayo. Kaarkaaga TAP Go-To Card waxa uu shaqeeyaa uun muddo hal sanno ah sidaa awgeed waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad dib u codsato. is only good for one year so you may need to reapply.



**Macaamiishu waxaa  
dhici karta inay xaqu  
yeeshaan kirooyinka  
jaban ee Barnaamijka  
Gargaarka Gaadiidka  
(TAP)**

Ka ogow arrintaa [metrotransit.org/TAP](http://metrotransit.org/TAP)

**Metro Transit**  
a service of the Metropolitan Council

612-373-3333  
[metrotransit.org](http://metrotransit.org)

06-22-65719-19

**T** Metro Transit

# Ku raac \$1 adigoo adeegsanaya Barnaamijka Gargaarka Gaadiidka (TAP)

Barnaamijka gargaarka Gaadiidka (TAP) waxaa loogu tala galay inuu ka dhigo kirada gaadiidka dadweynaha kuwa u jaban dadka dakhliga yar. TAP waxa ay siisa kiro jaban kaararka Go-To\_Card. Waxa ayna u ogolataa macaasmiisha inay ku raacaan bas ama tareen \$1 uun markiiba – xataa xilliga samxada – iyagoo leh wareejin 21/2 ah.

## Is qoridu waa fududahay!

### Ka codso khadka (online) ka ama tagid goobta ah

#### **Khadka (online)**

[metrotransit.org/tap-enrollment-form](http://metrotransit.org/tap-enrollment-form)  
buuxi codsi. Geli iskaan ama sawirkha aqoonsigaaga (ID) iyo dukumiinti la ogol yahay.  
Kolkii la ansaxiyo kaarkaagu waxa uu kuugu imaan boostada asbuuc ka dib.

#### **Tagid goobta**

La imow Aqoonsigaagga iyo dukumiinti la ogol yahay Goobta Gaadiidka si aad u hesho kaarkaaga markiiba.

**Minneapolis Metro Transit Service Center**  
719 Marquette Avenue, Minneapolis  
7:30 a.m. - 5:30 p.m.

**St. Paul Metro Transit Service Center**  
US Bank Center Skyway  
101 E. 5th Street, St. Paul  
9 a.m. - 4:30 p.m.

**SouthWest Transit Station**  
13500 Technology Drive, Eden Prairie  
6:30 a.m. - 6:30 p.m.

**Burnsville Transit Station**  
100 Highway 13, Burnsville  
8 a.m. - 4:30 p.m.

### **Kulanada Is-qorida ah**

Shaqaalaha Metro Transit waxa ay heegan ku yihiin rugta si ay u qoraan macaamiisha una qaybiyaan Kaararka TAP Go-To Cards.

Waqtiyada iyo goobaha, ka eeg shabakada [metrotransit.org/tap-enrollment-events](http://metrotransit.org/tap-enrollment-events)

### **Iskaashatada Qaybiyeyaasha TAP ka**


Tirooyin isa soo taraya oo hay'ado ah ayaa xaqijiin kara dukumiintiyada bixina kara TAP Go-To Cards.

#### **Dukumiintiyada la ogol yahay**

Tus kaar sawir leh ama warqada biilk korontada oo ciwaankaaga iyo magacaagu ku qoran yahay iyo dukumiinti kale oo cadeyn ah si aad u muujiso inaad ka soo baxayso shuruudaha dakhliga.

Booqo [metrotransit.org/tap](http://metrotransit.org/tap) si aad uga hesho liiska ay ku idil yihiin dhamaan dukumiintiyada la ogol yahay ama Wac 612-373-3333.

#### **Tusmo ah dukumiintiyada la ogol yahay**



### **Ku Rid Iacag kaarkaaga TAP ka**

Kolka la ansaxiyo, Metro Transit waxa ay ku dari TAP ka jaban kaarka cusub ee Go-To Card ama kaarkaaga aad hadda haysato – ka dib lacag ku darso lana dhaqaaq!

- Khadka [metrotransit.org](http://metrotransit.org) ee kaarka amaahda
- Telefoon ahaan 612-373-3333 ee kaarka amaahda
- Boostada kaarka amaahda ama jeeg Wac 612-373-3333 si aad boostada ugu dalbato
- Mashiinka tigidhada lacag cadaan ah ama kaarka amaahda
- Iskii kaar amaah loogala baxo. Is-ka qor [metrotransit.org/AutoRefill](http://metrotransit.org/AutoRefill)